Somali

Horumarka Cunugaada

FASALKA

X

Himilooyinka waxbarashada sannad dugsiyeedka 2011-12

Heerarka Laga Filayo Waxbarashada: Fasalka Xanaanada

Ardaygaada xanaanada waxa uu leeyahay ujeedooyin qaas ah oo uu doonayo inuu ka gaaro maado kasta. Qiyamka waxbarashada Washington yaa qeexay aqoonta iyo xirfadaha ardaydu ay tahay inay ku helaan mawduuc cashar kasta laga bilaabo kindergarten-ka. Macallin walbaa waxa uu mas'uul ka yahay ma aha kaliya uun ka filitaanka heerka darajo fasal ee maaddada uu markaas barayo, laakiin waliba kuwii fasalladii la soo dhaafay. Hoos waxaa ku qoran tusaalooyinka himilooyinka waxbarashada muhiimka ah ee loogu talagalay kindergartenka. Si aad uga ogaato arrimo dheeraad oo ku saabsan heeraka laga filayo gobolkeena, booqo: www.k12.wa.us/standards.

QORAALKA

- Yaqaano in dhagaysashadu ka baxsan tahay nafsadiisa iyo fahamo in qoraalku leeyahay ujeedo kala duwan.
- Falanqaynta fikrada, doorashada mawduuca iyo ku darida faahfaahinta.
- Aqoonta iyo raacinta hingaada, hakadka, xarfaha waaweyn, naxwaha iyo cutubka ku haboon heerka fasalka.

XISAABTA

- In (ardaygu) bilaabo inuu horay ugu maro fikradaha aasaasiga ah ee tirooyinka iyo isticmaallada tirooyinka si ay uga fikiraan waxyaabaha iyo adduunka agagaarahooda jira.
- Inay bartaan micnaha waxay ka dhigan tahay in la isku geeyo ama la kala jaro iyaga oo isku keenaya ama kala fogeynaya sheyo.
- Barta inay qeexaan astaamaha qaababka joomatariga, ee ay ka midka yihiin saddex Xagalka, afargeeslaha iyo goobaabyada.

AQRINTA

- Fahmo iyo ku dabaqo ujeedadda qoraalka iyo dhawaaqa.
- Balaariyo xirfadda luqada hadalka iyo barto erayo macno leh oo aqrinta.
- Soo bandhiga fahmida isagoo ku jawaabay siyaabo kala duwan marka uu dhagaysanyo ama uu eegayo buugaagta oo idil.
- Muujiyo xiisaha buugagta kala duwan.

SAYNISKA

- Waxay bartaan inay wax baaritaanka cilmiyeysan ay ku jirto isku dayga ka jawaabka su'aalaha iyada oo waxyaabaha loo fiirsado ama waxyaabaha la tijaabiyo.
- Waxay bartaan sida loo istcimaalo qalabyada fudu (tus., qalimo-rasaas, maqasyada) iyo waxyaabaha (tus., waraaq, dejiyaha, koollada iyo baakadaha adag) sidii loo xallin lahaa masalooyinka siyaabo hab-curis leh.
- Waxay bartaan sifooyinka dareerayaasha iyo waxyaabaha adag.

Muraadka Waxbarashada Gobolka Washington

Afarta muraad ee gobolka ee hoos ku qoran waxay bixiyaan saldhigga horumarka Cilmiga Waxbarashada Muhiimka ah ee Loo baahan yahay (EALR), kuwaasoo cabira kororka waxbarashada iyo la xisaabtanka:

1. Aqriska wax fahanka, xirfad wax ku qorida iyo isku xirka joogtada ah iyo dariiqyo kala duwan oo masuuliyad iyo habab kala duwan leh.

2. Yaqaana iyo sameeya aqoonta guud iyo guud ahaan xisaabta, sayniska, farshaxanka, aqoonta bulshada, caafimaadka iyo jir dhiska.

3. U fakaro si isku celcelin ah, qiyaasaan iyo wax soo saar leh, iyo iskugu xiro waayo aragnimadiisa iyo aqoonta qiyaasida iyo xalinta dhibaatooyinka.

4. Fahmida muhiimada shaqada iyo sida soo bandhigida, dadaalka iyo go'aanku uu si toos ah ugu lug leeyahay shaqada mustaqbalka iyo fursada waxbarashada.

Office of Superintendent of Public Instruction
www.k12.wa.us
August 2011

Imtixaanka Gobolka Washington: Darajada Fasallada 3-8

Ardayda ku jirta fasallada 3-8 inta ugu badan ayaa ka qaaadan doona Qiyaasaha Horumarka Aradayda (MSP). Qiyaastii boqolkiiba hal ayaa ka qaybgali Imtixaannada Habka u Dhigma Qiyaasta Ardayda Washington (WAAS), oo barnaamij u digma midka hore oo ay galaan ardayda barnaamijka waxbarshada qaaska ah.

Magaca MSP ayaa xanbbaarsan himilada imtixaanka: Si *loo qiyaaso horumarka ardayga*. Imtixaanka gobolku waa inuuna noqqon waxa kaliya ee xukuma xirfadaha iyo aqoonta tacliinta ardayga. Waxqabadka ardaygu siday u dhan yihiin waa in la qaddariyaa. Haddii wax su'aalo ah aad ka qabtid ilmahaaga waxbarashadiisa, fadlan la xiriir macallinka ama dugsiga ilmahaaga.

Imtixaamitaanka Gobolka Su'aalaha inta Badan la Warsado (FAQ)

Waa maxay noocaca su'aalood ee ku yimaad imtixaannada gobolka?

Aqriska, xisaabta iyo sayniska MSP-ga waxa ka mid ah su'aalo jawaabaha la kala doorto leh iyo su'aalaha jawaabta gaaban u baahan. Su'aalaha afarta-dhibcood la siinayey ayaa laga daayey imtixaannada akhriska, xisaabta iyo sayniska. Wax ka beddelkan ayaa u oggolaaneysa ardaydu inay muujiyaan inay karti u leeyihiin xallinta masalooyinka, iyaga oo aan marka dhibco lagu siin kartidooda qoraalka. Waxaan leenahay imtixaan MSP oo qoraal ah fasllada 4aad iyo 7aad.

Fadlan booqo www.WAtesting.com si wax dheerad ah aad uga ogaato waxa ku saabsan imtixaanka gobolka.

Ku Wareegga Imtixaanka Onlineka ah

Washington Maaha gobolka ugu horreeyey ee ku dhaqaaqa in imtixaan lagu qaadi intarnatka, laakiin waxay ku jirtaa hogaamiyayaasha. Ujeedada Gobolku waxa weeyaan in inta badan ee ardayda iskuulka dhexe iyo ka hoose ee waxakhriska iyo xisaabta, iyo sayniska, imtixaanka lagaga qaado dhinaca combiyuutarka ee dhamaan isguulada ka hor taariikhda 2014.

Waqtiga kuleylihu soo galayo ee 2012, imtixaanka MSP, ee fasalada 3-8, waxa lagu qaadi-doonaa intarnatka, iyada oo fasalada 3aad ay noqon-doonto markii ugu horeysay. Cilmi-baadhis ayaa lagu sameeyay sidda ay u suura-gali-karto in imtixaanka lagu qaado intarnatka, ee arrimaha la xidhiidha qoraalka fasalada 4aad illaa kuwa 7aad, ee casharada qoraalka.

Yaa Imtixaanka Laga Qaada Iyo Goorma?

Sharciga federaalka ah ee Ilmana Ayaan laga Tagin ayaa u baahn in sannad kasta lagu imtixaamno ardayda darajada fasallada 3-8 iyo 10 akhriska iyo xisaabta, iyo saddex darajo fasal (fasallada 5, 8 iyo 10 Washington gudaheeda). Gobolkeenu waliba waxa u ku imtixaamaa ardayda qoritaanka (dajada fasallada 4, 7 iyo 10). Gobolkeena ayaa waliba u guuray dhinaca imtixaamidda onlaynka.

Fasalka	3-aad	4-aad	5-aad	6-aad	7-aad	8-aad	9-aad	10-aad	11-aad	12-aad
Aqrinta	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	NT	✓	*Loo baahan yahay kaliya haddii u ardaygu la kulmin waxa looga baahan yahay qiimaynta qalin-jabinta gobolka.*	
Xisaabta	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓	✓		
Qoritaanka		✓			✓		NT	✓		
Sayniska			✓■			✓■	✓	✓		

■ Lagu bixin doono online markay tahay guga 2012

NT Mawduuca casharka aan la imtixaamin (fasalada 9aad oo kaliya ayaa qaadandoona imtixaanka dhamaadka tacliinta ee xisaabta iyo culuumta, haddii ay duruusdaa dhigtaan).

Somali

FASALKA X

Jadwalka Imtixaanka

Dugsiyada ayaa ka qaada imtixaannada gobolka fasallada 3-8 markay tahay guga. Imtixaanka MSP hadda waxa la bixiyaa Mey. Darajo fasal kasta ayaa imtixaannada akhriska iyo xisaabta qaadaya (1 maalin mid kasta), halkay kuwa kalena waliba imtixaanka qoraalka (2 maalmood) iyo sayniska (1 maalin) ku qaadanayaan. Mudada imtixaanka lagu qaado ee qalinka rasaaska iyo waraaqdo waa illaa 3 wiig, markaa isguulada ayaa doorta maalmaha ay imtixaankaa qaadi-doonaan. Fadaln kala xiriir dugsigaaga waxa ku saabsan kaalanderka imtixaanka gaarka ah.

Waa maxay micnaha dhibco natiijo (score) ee MSP?

Ardayda ayaa ka hesha dhibco natiijo (score) imtixaan kasta MSP oo ay qaataan. Darajeeyntaasina waxay ku saleeysan tahay sida uu ardaygu uga soo baxay imtixaankaas, sidaas la adligeed kuma aad arki doontid boqolayda badanaaba aad ku aragto imtixaanada kale. Darajeeyntuna waxay noqotaa mid ka mid ah xadadkaan:

Xadka **4** **Dhaafay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **3** **Soo Buuxiyay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **2** **Ka hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysa qaar ka mid ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **1** **Aad uga hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysa inuu bartay wax yar oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

For more information
OSPI: www.k12.wa.us
MSP/HSPE: www.WAtesting.com
Su'aalaha: StateTesting@k12.wa.us

August 2011